

Ma garanaysaa waxa xaquuqdaada tahay?

XEERKA CAAFIMAADKA SHAQADA IYO BADBAADADA ONTARIO

— HAGAHA WARBIXINTA —



XAQUUQAHA SHAQAALAHA

- » Waxaad **XAQ U LEEDAHAY INAAD OGAATID** wax ku saabsan haliso walbo ee shaqada ee aad la kulmi kartid.
- » Waxaad **XAQ U LEEDAHAY INAAD KA QEYBQAADATID** nidaamka aqoonsashada iyo xalinta walaacyada caafimaadka iyo badbaadada.
- » Waxaad **XAQ U LEEDAHAY INAAD DIIDID** inaad sameysid shaqada aad aaminsantahay inaysan badbaado aheyn.

Waa **SHARCI DARO IN BADROONIGAAGA KU CIQAABO** ama kugu hanjabo inuu kuu ciqaabay ku dhaqmida ama ku weydiinayo wax ku saabsan xaquuqahaan.

WAA MAXAY CAAFIMAADKA SHAQADA IYO BADBAADADA?

Xeerka Caafimaadka Shaqada iyo Badbaadada Ontario (OHSA) wuxuu siiyaa shaqaalaha xaquuq. Waxay dajisaa doorarka badrooniyada, kormeerayaasha iyo shaqaalaha marka **GOOBTA SHAQADA WAXAA LAGA DHIGI KARAA BADBAADO**.

YAA KU DABOOLAN OHSA?

KU DHAWAAD QOF WALBA ee ka shaqeynayo Ontario, haddii la mideeyo ama aan la mideyn, wuxuu ku daboolanyahay OHSA.

MASUULIYADDA LOO SHAQEYAHAA

Loo-shaqeeyayaashu waa inay qaataan taxaddar kasta oo macquul ah si ay u **ILAALIYAAN SHAQAALAHA**.—OHSA 25(2)(h)

WAAJIBAADYADA SHAQAALAHA

Si loogu caawiyo joogteyn badbaadada iyo caafimaadka goobta shaqada, waxaad sidoo kale leedahay waajibaadyo. Shaqaalaha waa inay:

- » **RAACAAN SHARCIGA** iyo xeerarka iyo nidaamyada caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada.
- » **XIRO OO ISTICMAAL** qalabka illaalsan ee looga baahanyahay badrooniga.
- » **SHAQADA IYO XEERKA** ee qaabka aanan waxyeelaysan nafsadooda ama qof kale.
- » **KU SOO WARGELI** haliso walba ama dhaawacyo kormeerahaaga.



XAQUUQDA LAGU OGAADO

Waxaad xaq u leedahay inaad heshid **TABABAR** si markaas aad:

U SAMEY SHAQADAADA SI BADBAADA

OGOW WAXA LA SAMEEYO XAALADA DEGDEGA AMA DHAAWACA

Si wadajir ah iyo **OHSA** waxaa jiro sharuudo u baahan in badroonigaaga hubiyo in si ku fillan u tababarantahay oo lagu ogeysiiyay inaad shaqadaada sameysid.

Tusaale ahaan:

- » **Badroonigaaga** waa inuu hubiyaa inaad heshid aasaaska **TABABARKA CAAFIMAADKA IYO WACYIGELINTA BADBAADADA**.
- » **Haddii aad la shaqeysid KIIMIKOOYINKA HALISAHAA** ama waxyaabaha halista kale waxaad xaq u leedahay in lagu tababaro sida loo isticmaalo oo loo qaabilo waxyaabaha badbaadada, iyo waxa saameynada caafimaadka ay tahay ee gaaristooda.
- » **Waxaa jira khataro kale oo badan oo aad XAQ U LEEDAHAY IN LAGUU TABABARO** haddii aad la kulanto.



Waxaad xaq u leedahay inaad heshid **WARBIXINTA** ee noocyo badan ee halisaha ka jiri karo goobtaada shaqada, oo ay ku jiraan:

MASHIINKA IYO QALABKA

SHARUUDAHAA SHAQADA

RABSHADA IYO DHIBAATEYNTA SHAQADA

Sharuudaha OHSA ee badroonigaaga sameynayo **WAX WALBA MACQUUL AH** si lagaaga illaaliyo in lagu dhibaateeyo ama aad heshid jirada shaqada la xiriirto.



XAQUUQDA LOOGA QEYBQAADANAYO

OHSA waxay ku siineysaa xaquuqda looga qeybqaadanayo oo looga qeybgalayo caawinta lagu sameynayo oo loogu haynayo goobtaada shaqada si badbaado ah oo caafimaadan. Sida ku saleysan inta shaqaale ee shaqeeya, goobaha shaqada waxay u baahanyihiin inay lahaadaan:

JHSC

GUDDIGA CAAFIMAADKA IYO BADBAADADA WADAJIRKA AH (JHSC) iyo bar ka mid ah guddiga waxay ka koobanyihiin shaqaalaha.

HSR

WAKIILKA CAAFIMAADKA IYO BADBAADADA (HSR) kaas oo u baahan inuu ahaado mid ka mid ah shaqaalaha.

20+ SHAQAALE

- » **WEYDII SU'AALAHAA** markii aadan hubin wax ku saabsan.
- » Shaqaale walba wuxuu xaq u leeyahay iyo masuuliyada ee lagu soo **WARGELINAYO HALISO WALBA** ee shaqada kormeerahooda.
- » Waxaad ku caawin kartaa **HSR** ama xubinta shaqaalaha ee **JHSC** adiga oo **TILMAAMAYO** halisaha suurtoogalka ah ee goobtaada shaqada.
- » Waad **TABARUCI/ISKA WAX UQABSAN** kartaa ama waxaa **KUU MAGACAABI KARA** ururkaaga inaad noqoto **HSR** ama xubin shaqaale ah oo ka tirsan **JHSC**.

6-19 SHAQAALAHAA

MA OGTAHAY?

ABRIIL 28ka waa Maalinta rasmiga ee Baroordiiqa **Qaranka Canada** oo shaqaalaha la dilay oo ku dhaawacan shaqada. Waxaa illaalinayay ururada Kanediyaanka tan iyo 1984, waxaa si rasmi ah waxaa ugu dhawaaqay Dowlada Canada ee 1991, oo waxay ku faaftay tan iyo xiligaas wax ka badan 100 wadan. Shaqaalaha, qoysaskooda, iyo ururradoodu waxay isu yimaadaan **Abriil 28** si ay qadarin ugu muujiyaan shaqaalaha ku dhintay iyo kuwa ku dhaawacmay shaqooyinka Kanada iyo adduunka oo dhan, iyagoo inta badan ubaxyo dhiga taallooyin maxalli ah si ay u sharfaan.

HORMARINTA CAAFIMAADKA IYO BADBAADADA GOOBTAADA SHAQADA

Ogow wax ku saabsan **JHSC** ama **HSR**. La hadal iyaga iyo shaqaalaha aad isla shaqeysaan wax ku saabsan walaacyada badbaadada iyo caafimaadka. Haddii badroonigaaga uusan sheegin walaacyada, waxaad ku dhaqmi kartaa xaquuqdaada aad ku diideysid shaqada haddii aad aaminsantahay inaysan badbaado aheyn. Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Wasaarada Shaqada **1-877-202-0008** ama ka ogow warbixin badan www.labour.gov.on.ca

BADROONIGA KU CIQAABAYO ADIGA AMA KUU HANJABAYO?

Haddii aad dareento in loo-shaqeeyahaagu uu tallaabo ka adhan ah qaadayo oo ku saabsan kor u qaadista welwelka caafimaadka iyo badbaadada ama adeegsiga xaquuqdaada caafimaad iyo badbaado, waxaad la xiriiri kartaa Wasaarada Shaqada ama ururkaaga, haddii aad mid ka tirsan tahay. Haddii aadan ka mid aheyn urur waxaad ka raadin kartaa caawin bilaash ah **XAFIISKA LA TALIIYAHAA SHAQAALAHAA (1-855-659-7744)** ama **XARUNTA SHARCIGA CAAFIMAADKA IYO BADBAADADA SHAQAALAHAA (1-877-832-6090)**. **KALIGAA MA TIHIDI!**

XAQUUQDA LAGU DIIDAYO SHAQADA AAN BADBAADADA AHEYN

Waxaad xaq u leedahay inaad diidid shaqada aan badbaadada aheyn halka aad haystid **SABABTA LAGU AAMINO** in:

- » **Shaqada aad sameyneysid ama QALABKA AMA MASHIINKA** aad isticmaaleysid laga yaabo inuu ku waxyeelo ama qof kale aad la shaqeysid ama xaalada jirka ee goobta shaqada waa halis; ama
- » Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad diidid shaqada haddii aad halis ku jirtid ee ka imaanays **RABSHADA GOOBTA SHAQADA**.

SIDA LOO DIIDO SHAQADA AAN BADBAADADA AHEYN

01

Xiliga diidmada shaqada aan badbaadada aheyn, waa inaad ku wargelisaa **ISLA MARKIIBA BADROONIGAAGA AMA KORMEERAHA**.

02

Badroonigaaga waxaa **SHARCI AHAAN LOOGA BAAHANYAHAY INUU LA BAARO** xubinta shaqaalaha ee **JHSC** ama **HSR**.

03

Waa inaad ku hartaa **MEEL BADBAADO AH, U DHOW SILDHIGA SHAQADAADA**, illaa baaritaanka la dhameystiro.

04

Haddii aad haystid **SABABO MACQUUL AH** ee loogu fakaro in shaqadaada ay weli halis tahay ee xigtaa baaritaanka badrooniga, badrooniga waa inuu lahaadaa **BAARAHA WASAARADA SHAQADA** ee loogu yeero inay baaraan.



MAXAAD SAMEYNEYSAA HADDII AAD KU WAXYEELANTID SHAQADA?

- Haddii aad ku dhaawacantid shaqada ama hormarisid jiro sababtoo ah gaarista kiimikooyinka sunta, waa inaad:
- » **RAADI DARYEEL CAAFIMAAD** (gargaarka koowaad iyo/ama daryeelka caafimaadka).
- » **U SHEEG BADROONIGAAGA** sida ugu dhaqsiiha badan ee suurtoogalka ah.
- » **HAYSO DIIWAANKA** tafaasiisha la xidhiidha.